



MASHRUUCA HAGAAJINTA 15TH AVE S

Dhismaha waxaa la filayaa in uu bilowdo xilli hore ee sanadka 2021!


SOO KOOBIDA MASHRUUCA

15th Ave S ee u dhaxaysa S Spokane St iyo S Angeline St waxay isku xir muhiim ah siisaa dadka ku safraya dhanka Beacon Hill. Waaxda Gaadiidka (Seattle Department of Transportation, SDOT) waxay hagaajinaysaa marinkan kaasoo isku dheelitiraya baahiyaha dhammaan dadka adeegsanaya si qof kasta uu ugu heli karo halka uu doonayo inuu ku aado si aamin ah oo fudud.



Hagaajinta dhanka badqabka waxaa laga samayn doonaa isgoyska 15th Ave S, S Columbian Way, iyo S Oregon St.

GOOBTA MASHRUUCA



HAGAAJINTA MARSHABIYEEDKA

Laga bilaabo isgoyska S Columbian Way iyo S Spokane St, bariga 18th Ave S iyo koonfurta S Angeline St, waxaan:

- Samayn doonaa marshabiyeedi cusub
- Samayn doonaa hagaajin dhanka bullaacadaha ah
- Samayn doonaa hagaajin dhanka meelaha ay dadka lugeynaya maraan ee goobo la doortay

Sidoo kale waxaan hagaajin doonaa wadada u leexata kaliya dhanka midig ee 15th Ave S iyo S Spokane St.

Sanad kasta, waxaan hagaajinaa wadooyin muhiim ah oo xaalad liidata ku sugan si looga dhigo kuwa aamin ah oo fudud iyo si loo kordhiyo waxtarkooda muhiimka ah. Dhisida sidoo kale waxay abuuraysaa fursado lagu hagaajinayo badqabka wadada iyo in gubbinta dadka iyo badeecadaha ay ahaato mid waxtar ku leh gudaha Seattle oo sii kobcaysa.

HAGAAJINTA ISGOYSKA

Isgoyska 15th Ave S, S Columbian Way, iyo S Oregon St, waxaan:

- Ku dari doonaa ilaalin loogu talagalay dadka baaskiilka kaxaynaya
- Hagaajin doonaa nalalka loogu talagalay dadka lugaynaya ama gudbaya
- Dhaqaajin doonaa boosteejada baska
- Samayn doonaa goob u qalanta dadka lugaynaya, baaskiilka kaxaynaya, iyo dadka ka gudbaya dhanka S Columbian Way iyo 15th Ave S

Isgoyskan wuxuu jahawareerinayaa dadka lugaynaya, gudbaya, baaskiilka kaxaynaya, iyo kuwa gaariga kaxaynaya. Mashruucan gudahiisa, waxaan isgoyskan ka dhigi doonaa mid aamin ah, naga dhigaya kuwa u dhow Mashruuca Badqabka Taraafikada ee (Vision Zero): Qorshaha Seattle ee dhamaynta dhimashooyinka iyo dhaawacyada daran ee dhanka shilalka taraafikada ee wadooyinka magaalada marka la gaaro 2030.

Su'aalo dheeraad ah miyaad qabtaa? Ma danaynaysaa inaad hesho macluumaadka cusub ee mashruuca?

BOOQO: seattle.gov/transportation/15th-Ave-S-AAC

IIMAYL: 15thAveAAC@seattle.gov **TALEEFAN:** (206) 775-8719




Seattle
Department of
Transportation



SOO KOOBIDA HAWSHA DHISMAHA

Dhismaha waxaa loo qorsheeyay inuu bilowdo bilowga 2021 uuna socda illaa 8 bilood. Goobaha badankood, dib u dhisida waxay ku lug leedahay beddelida 2-3 inji ee wadada. Goobaha qaar waxay u baahan doonaan dayactir qoto dheer, ama shaqo gaar ah oo loogu talagalay bullaacadaha, marshabiyeedyada, iyo waxyaabo kale. Qandaraaslaha wuxuu ka shaqayn doonaa qaybaha, laga bilaabo dhamaadka koonfureed ee goobta masharuuca illaa dhanka waqooyi. Qayb kasta waxay qaadanaysaa 1 illaa 3 toddobaad si loo dhamaystiro, waxayna ku xiran tahay shaqada, cimilada, iyo asbaabo kale..



WAXA LA FILAN KARO INTA LAGU GUDA JIRO DHISMAHA

- Buuq, boor, gariir, iyo qalab waaweyn
- Yaraynta ama leexinta wadooyinka la maro iyo marshabiyeedyada
- Si ku meel gaar ah u xirida wadooyinka, ama saamayn ku yeelashada maalmo dhowr ah halkii marba.
- Xiritaanka isgoyska oo ku meel gaar ah

Dhaqdhaqaaqa dhanka gancasiga wuu sii soconayaa, ganacsiyada iyo dadka deegaanka si hordhac ah aya loo ogeysiin doonaa haddii ay jiraan xiritaan dhanka wadooyinka ah. Waxaad filan kartaa inaad goobta mashruuca ku aragto calaamad leexin ama xiritaan oo cad wax ku oolna ah.

XIRIIR SAMEE

Si lagu ogeysiyo wax ku saabsan mashruucan, waxaan si hordhac ah ogeysiin ugu bixinaynaa dhanka iimaylka, munaasabada, iyo bogga mushruuca.

CALAAMADAHA KHARIIDADA HAGAAJINTA ISGOYSKA:

- Qalooqa marshabiyeedka
- Sanduuqa baaskiilka (ilaalinta baaskiilka ee dhanka isgoyska)
- Wadada baaskiilka ee horay u jirtay oo laga dhigayo mid la ilaaliyey
- Wadada baaskiilka ee la ilaaliyey oo horay u jirtay
- 🚌 Boosteejo bas oo horay u jirtay
- 🚌 Boosteejo bas oo cusub
- P Baakinka la ilaalinayo
- 25 Xaddidida xawaaraha 25 mile saacadiiba
- 🚫 Wadooyinka La Degan Yahay
- 🚧 Goob loogu talagalay dadka lugeeya (waxay dadka lugeeya siinaysaa waqti badan oo ay ku gudbaan ka hor inta aysan is beddelin nalalka taraafikada)
- 🚧 Nal

MAALGELINTA Maalgelinta waxay ka imaanaysaa mashruuca 9-ka sano ee Levy to Move Seattle, oo ay ansixiyeen codbixiyayaasha markay ahayd 2015, taasoo bixisa maalgelin si loo hagaajiyo badqabka dhammaan dadka safraya, loo hagaajiyo wadooyinka iyo buundooyinka, iyo maalgashi dhanka ikhtiyaaraadka safarada oo la awoodi karo, la iskuna halayn karo oo loogu talagalay magaalo sii kobcaysa.

Qaybta dhisida ee mashruucan waxaa maalgeliyay barnaamijkeena dhisida iyo Deeqda Ilaalinta ee Maamulka Fedaraalka ee Wadooyinka (Federal Highway Administration [FHWA] Preservation Grant) oo ay maamusho Waaxda Gaadiidka ee Gobolka (Washington State Department of Transportation, WSDOT). Mashruucan sidoo kale wuxuu maalgelin ka helayaa barnaamijka SDOT ee Safe Routes to School, kaasoo ardayda uga dhigaya si fudud oo aamin ah inay ugu lugeeyaan oo baaskiilna ugu kaxeeyaan gudaha Seattle.

Su'aalo dheeraad ah miyaad qabtaa? Ma danaynaysaa inaad hesho macluumaadka cusub ee mashruuca?

BOOQO: seattle.gov/transportation/15th-Ave-S-AAC

IIMAYL: 15thAveAAC@seattle.gov **TALEEFAN:** (206) 775-8719

